Haninge kommun

Utbildningsförvaltningen

Doorashada dugsiga xadaanada ee sannad dugsiyeedka

Xaddaanadu waa hab dugsiyeed gaar ah kaas oo xor loo yahay doorashadiisa, laakiin ay qasabku tahay inuu kamuunku sameeyo, marka laga bilaabo semisterka deyrta ee uu ilmahu buxinaayo lix sanno.

Sidda waafaqsan xeerka gudiga dugsiga hoose iyo xaddaanadaha ayaa waalidiinta carruurta tahey lix sanno ayaa la siinayaa fursada ay ku dooranayaan dugsiga.

Ogow waa inaad dalabkaaga ka diiwaan galiso xataa hadii aad dalbanaysaan dugsiga ilmahaaga meelaynta xaqa ugu leeyahay! Taas waa si loogu dhib yareeyo meelaynta, Dugsiga ilmahaagu meelaynta xaqa ugu leeyahay ayaad ka arkeysaa markaad soo gasho bogga skolvalet-ka.

Haddii aad dalbato dugsi kamuun kale oo Haninge ku yaala, oo aan aheyn ka ilmahaagu meelaynta xaqa ugu leeyahay, ayuu maamulaha dusigu ga'aamianyaa haddii boos la siin karo. Taas *ayaa* dhici karta inaan dugsi, sabab boosaska banaan awgeed aanay qaadan karin dhamaan inta soo dalbatey.

Xoriyadda dalabka doorashada ee kamuunka Haninge waxa <u>dugsiga</u> oo kaliya, ee maaha dalabka fasalka, kooxda ama barraha.

Xeerka meelaynta

Marka hore waxa booska la siinayaa ardeyda ay waalidkoodu soo dalbadeen dugsiga ay carruurtu meelaynta xaqa ugu leeyihiin.

Haddii uu waalidku dalbado dugsi ku yaala kamuun kale oo aan aheyn Haninge ayaa waxa shaqeynaaya meelaynta sida waafaqsan kala horeysiinten.

1. Haddii ilmahu uu leeyahay walaal dugsiga dhigta.

1. U dhawaanshaha dugsiga la raadsaday (laakiin wali ka baxsan eeriyada laga qaadanaayo). Waa inta loo socdo ta go'aaminaysaa, ee maaha intey marka dush laga eego ay iskaga jiraan.

Waalidiintya aan wadda deganeyn

Haddii mid ka mid ah waalidku uu degan yahay cinwaan kale oo aan aheyn ka ilmahu uu ku qoran yahay ayay tahay in labada waalidba ay ogolaadaan dalabka si uu kaasi u noqdo mid meel mara. Ogolaanshagaas waxa uu dhacayaa marka warka ogolaanshaha qaadashada loo diro waalidka.

V.G. Vänd

Doorashada dugsiga xorta (ee ku yaala ama ka baxsan Haninge)

Haddii aad dalbato dugsi xor ah waa in dalabka toos loogu gudbiyaa dugsigaas.
Waxa go'aankaas in ilmahaaga boos la siiyo iska leh dugsiga qaadanaaya.
Doorashada dugsiga ku diiwaan geli inaad dooranaysaan dugsiga xorta ah oo sheeg magaca dugsiga.

Doorashada dugsiyada kanuunka kale

Haddii aad doonayso boos dugsi oo ka baxsan kamuunka Haninge, ayaa dalabka toos looga sameynayaa dugsigaas. Waa dugsiga qaabilaaya cida go'aanka ka gaadheysa in ilmahaaga la siinaayo boos.
Doorashada dugsiga ku diiwaan geli inaad dooranaysaan "Dugsi ku yaala degmo kale" oo sheeg magaca dugsiga.

Ogsoonow inaan kanuunka Haninge masuul ka aheyn qaadashada dugsiyada xorta iyo kuwa kanuunada kale!

Afka hooyo

Ardeyda leh waalidiin ku hadla luqad kale oo aanu iskiidhidh aheyn luqadooda hooyo oo ay luqada hooyo tahay waxay maalintii guriga ku wada hadlaan, ayaa xaq u leh waxbarashada afka hooyo. Afka hooyo waxaad ku dooranaysaa fom gaar ah oo laga helaayo haninge.se/forskola-och-skola/modersmal/

Gaadiidka dugsiga (tagsi iyo kaadhka –SL ka)

Ardayda dhigata dugsiga xanaanada xaq uma laha gaadiidka dugsiga. Ardayda dhigata fasaladda 1-9 ee taga dugsi kale oo aan ahayn booskoodi dugsiga waxay fursado koooban u haystaan in loo ogolaado gaadiidka dugsiga. Ardayga xaq u leh gaadiidka dugsiga ee meelaynta aasaasiga ah ee dugsiga wuxuu xaq u yeelan karaa gaadiidka dugsiga ee dugsiga la doortay haddii safarada lagu tagayo dugsiga la doortay aanay kharashyo dheeraad ah ku keenayn degmada marka la bar-bardhigo wixi ku shaqaynayay meelaynta aasaasiga ah ee dugsiga.

Gaadiidka dugsiga waxaa loola jeedaa safarada gaadiidka (kaarka SL) iyo gaadiidyada dugsiga ee si gaar ah loola heshiiyay (baska dugsiga, tagsiga dugsiga, doon).

Xeerka macluumaadka shakhsiga PuL

Sida waafaqsan xeerka 10 § ee macluumaadka shakhsiga waa inuu kamuunku u maareeyo macluumaadka shakhsiga haddii ay muhiiim u tahay shaqada marka la sameynaayo tabobarka dawladda.

Macluumaadka shakhsiga ee lagu maareeyey adeega internedka "val av skola" ayaa loo diiwaan galinayaa sidda waafaqsan xeerka PuL. Ujeedada maarenta macluumaadka shakhsigu waa sidii loo maamuli lahaa doorashada dugsiga ee kamuunka Haninge. Macluumaadka afka hooyo ayaa ah muhiim in la maareeyo, iyadoo marmarka qaarkood ay ardeydu xaq u leeyihiin waxbarashada afka hooyo iyadoo kamuunka masuuliyad ka saarantey inuu hubiyo inay awood ku filan leeyihiin. Cida helaysa macluumaadka shakhsigu waa dugsiyada qaabilsan.

Qofka ka masuulka macluumaadka shakhsiga ayay masuuliyadiisa tahay inuu cid kasta oo sanadkii hal mar soo dalbata, lacag la'aan ugu siiyo warbixinta macluumaadka shakhsiga ee saameeya qofka dalbanaaya, haddii la maareeyay iyo hadii kaleba (26 § PuL). Qofka ka masuulka macluumaadka shakhsiga ayay sidoo kale masuuliyadiisa tahay dalab ka dib sida ugu dhakhsaha badan loo saxo, la

xayimo ama la tirtiro macluumaadka shakhsiga ee aan loo maareyn sida aan waafaqsaneyn sharcigan ama xeerarka la soo saarey (28 § PuL).

Gudiga dugsiga hoose iyo xaddaanadaha ayaa u cayintey qof aomudisman ah oo qaablisan macluumaadka shakhsiga kaas oo aad wxii caawimo iyo gargaar ah kala xidhiidhi karto. Wixii su'aalo ah, la xidhiidh barnochutbildning@haninge.se